

Golaha Wakiiladda

Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

Golihii 5^{aad} ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12^{aad} fadhigii 12^{aad}

Wakhtiga uu Furma:- 9:27 AM

Taariikhda: - Axad 17 August 2025

Gudoonka: - Mudane, Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon).

Quraanka: - Md. Sh. Axmed Dayib

Ajandaha Fadhiga: - **Doodda** Xeerka Rahanka iyo Hantida-maguurtada ah.

Md. Maxamed Xasan Siciid (12min, 09sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, xildhibaanada Golaha, waxaan halkan idinkula wadaagayaa aragtidayda ku saabsan Xeerka Rahanka Bangiyada, kaas oo lagu saleeyay ilaalinta xuquuqda Bangiyada, macaamiisha, fudaydinta maalgalinta iyo dhiirrigelinta koboca dhaqaalaha. Xeerkani waxa uu muhiim u yahay ganacsatada, hay'adaha maalgalineed iyo muwaadiniinta raba in ay hantidooda damaanad u dhigaan maalgalin.

Si kastaba, iyada oo aanan qiimayn cutubyada iyo qodobada, waxaan soo bandhigi doonaa meelaha uu xeerkani ku xooggan yahay, meelaha uu ku liito iyo sida loo hagaajin karo. Mudane Guddoomiye, marka aan u yimaado:

Qodobka koowaad, Bogga 1aad: Guddidu waxay magacii hore uga saaratay erayga “hantida ma-guurtada ah” waxayna beddeshay Xeerka Rahanka Bangiyada. Aragtidayda, magacu waa inuu si cad u qeexaa in uu xeerkani khuseeyo hantida ma-guurtada ah iyo ta guurtada ah, si loo waafajiyo qodobada kale ee xeerka.

Qodobka 3aad, Bogga 5aad: Waxaa lagu daray waafaqsanaanta shareecada Islaamka iyo ilaalinta dhinacyada iyo fudaydinta ganacsiga. Aragtidayda, waxaa muhiim ah in lagu darro faqradda qeexaysa doorka Guddida Shareecada ee Baanka Dhexe, si loo hubiyo in dhammaan heshiisyadu yihiin kuwo waafaqsan shareecada Islaamka.

Qodobka 4aad, Bogga 6aad: Xadka dabaqaada xeerka waxaa lagu dabaqayaa bangiyada ruqsadda ka haysta Baanka Dhexe. Aragtidayda waa in lagu darro hay'adaha kale ee maaliyadeed sida shirkadaha maalgalinta iyo kuwa caymiska.

Qodobka 11aad, Bogga 16aad: Mudanayaal, waxaad ka war haysaan in Maxkamadda Racfaanku ay shaqo badan Qaranka u hayso isla markaana kiisas badan oo racfaan ah yaallaan. Maxkamadda Racfaanka ayaa kaliya diiwaangelinaysa, taas oo keenaysa culays shaqo iyo daahin. Waxaan soo jeedinayaa in la sameeyo Xafiiska Rahanka oo madax-bannaan oo hoos yimaada Wasaaradda Caddaaladda ama Baanka Dhexe. Mudanayaal iga horeeyay waxay soo jeediyeen in xeer-ilaalinta la geeyo, taas ayaan ku raacsanahay.

Qodobka 16aad, Bogga 19aad: Bixin la'aanta daynta, muddada ogaysiinta waxaa laga dhigay 30 maalmood halkii ay hore u ahayd 90 maalmood. Aragtidayda, 30 maalmood aad ayuu u yar yahay, cadaadisna ku noqon karaa daysanaha. Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 60 maalmood.

Xaraashka hantida: Qiimaynta waxaa sameynaya hal khabiir ayuu xeerku dhigaya. Waxaan soo jeedinayaa in la isticmaalo ugu yaraan laba khabiir oo madax-bannaan, si looga hortago qiimayn aan cadaalad ahayn.

Qodobka 17aad, Bogga 26aad: Hagayaal iyo xeer-nidaamiyaal Baanka Dhexe ayaa soo saaraya, laakiin lama caddeyn heerka waafaqsanaanta shareecada. Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad waajibinaysa in hagayaashaasi waafaqaan standardka AAIOFI si loo hubiyo waafaqsanaanta shareecada.

Saamaynta dhaqaale iyo bulsho: Xeerkani waxa uu kobcinayaa dhaqaalaha, dhiirrigelinayaa maalgalinta, kordhinaya kalsoonida bangiyada. Hase yeeshee, haddii aan si hufan loo diiwaangelin loona caddeyn shareecada, waxa ay dhalin kartaa khilaaf sharci iyo mid bulsho.

Eray bixinta: Sixirka xaraashka labo jeer ayuu ku jiraa xeerka. Mid wuxuu ku qeexayaa qiimaha suuqa ee hantida la iibinayo, midna qiimaha ugu sarreeya ee naadada xaraashka. Waxaan soo jeedinayaa in meesha laga saaro midka hoose lana qaato midka sare. Waxa kale oo habboon in lagu daro eray-bixinta “Nootaayo sharci”, oo loola jeedo masuul sharci ah oo dawladda u xilsaartay xaqiijinta heshiisyada iyo documentiyada sharciga ah.

Ujeedooyinka xeerka: Waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro ujeedo gaar ah oo xusaysa ilaalinta xuquuqda macaamiisha iyo dhex-dhexaadnimada nidaamka rahanka.

Qodobka 5aad, dhismaha rahanka: Hantida la rahmi karo waxaa ka mid noqon karta hantida hal-abuurka maskaxeed (intellectual property) iyo agabyada maaliyadeed sida sukuubka iyo lacagta elektarooniga ah. Talo ahaan, waa in si cad loo qeexo hantida la rahmi karo, iyadoo lacagta account-ka ku jirta loo oggolaado, balse xeerku si khalad ah ugu daray qaybta hantida ma-guurtada ah.

Qodobka 10aad: Xuquuqda iyo waajibaadka dayn-bixiyaha. Faqrada 5aad waxa ay dhigayso in haddii hantida rahman ah ay ku baaba’do masiibo dabiici ah, dayn-bixiyuhu xaq uma laha inuu daysanaha ku qasbo hanti kale oo rahan ah. Waxaan soo jeedinayaa in halkii laga dalban lahaa hanti kale, lagu daro in daysanuhu soo keeno damiin (damiinul maal).

Fulinta iyo xaraashka hantida: Xeerku si faahfaahsan ayuu u sharxayaa hanaanka xaraashka, laakiin ma qeexayo sida loo ilaaliyo danaha daysanaha. Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro qodob ilaalinaya daysanaha si qiimaha hantidu uu ula jaanqaado suuqa waqtiga xaraashka.

Gunaanad: Xeerkani waa mid muhiim ah nidaamka rahanka, wuxuuna kor u qaadaya kalsoonida ganacsiga iyo maalgalinta. Hase yeeshee, waxaa lagama maarmaan ah in lagu daro faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta xuquuqda labada dhinac, nidaamka xaraashka iyo waafaqsanaanta shareecada. Waxaan ku raacsanahay doodihii xildhibaanada kale sida Maxamed Xuseen Jaamac (Rambo), Siciid Jaamac Cadde iyo Maxamuud Xayir, gaar ahaan arrimaha la xidhiidha magaca xeerka, ka mid noqoshada hantida guurtada iyo ma-guurtada iyo fududeynta dhalinyarada aan hanti ma-guurto ah haysan.

Md. Axmed Dayib Aadan (21min, 40sec): - Bismillaahi Raxmaani Raxiim, mudane **Guddoomiye** iyo mudanayaal, Xeerkani waa xeer aad iyo aad u muhiim ah, waa Xeer mudan in lagaliyo waqtiga aynu galinay waqti ka badan, waa Xeer laf-dhabar u ah dadka hantida ma-guurtada ah leh, ama ma-guurtada lahayn oo u suura galinaya in ay isku damiintaan hantidooda. Sida aynu ognahay, waxa yaala laba lifaaq, lifaaq shalay Guddida shareecadu inaga hor akhriday, iyo lifaaq ay keeneen Guddigii dhaqaalaha. Run ahaantii, Guddiga dhaqaaluhu lifaaqa ay keentay wax badan ayuu lumiyay, wuxuuna ka saaray meesha waxyaabo farabadan oo muhiim ahaa. Guddida shareecada, oo shalay lifaaq innaga horjeedisayna, wuxuu ka jawaabayay kaliya seddexdii qodob ee ay taabteen; kaliya ka hadlayay lifaaqii Guddiga dhaqaalaha ee xeerkaa rasmiga ahaa ma taabanayn. Labada faqraddood ee ay shalay inaga hor akhriyeen, hal faqro oo shareecada waafaqsanaanteeda ka waramaysay xeerka asalka ah waa Qodobka 30aad oo sidii shareecada waafaqsanayd ayuu ugu qoran yahay, hadaan si mug leh ugu galo doodayda.

Qodobka 1aad: Magaca Xeerka Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Rahanka Hantida Maguurtada ah ee Bangiyada; Xeer Lr. XX/2024; Waxaan u badalay sidan: Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Rahanka hantida maguurtada iyo guurtada ah ee Adeeg-xiyaha Maaliyadeed, Xeer Lr xxxx/2025.

Qodobka 2aad: Erey-bixin Qodobkan waxa aan ku soo daray hal erey bixin oo ah sidan: **Adeeg-bixiye maaliyadeed:** waa hay'ad ama shirkad bixisa adeegyo la xidhiidha lacag, maalgashi, iyo adeegyo dhaqaale oo kale — sida bangiyada, xawaaladaha, shirkadaha caymiska, iyo app-yada lacagta.

Cutubka 2aad: Rahanka Hantida Qodobka 5aad: Awooda Abuuridda Rahanka (Creation of Mortgage) Cinwaankan waxa habboon in sidiisa loo daayo oo aan tixgalin la siin cinwaanka ah “SHURUUDAHA ABUURISTA RAHAN” ee guddida dhaqaaluhu u beddashay. Sidoo kale faqradihiisan sidooda loo daayo.

Qodob cusub (Qodobka 6aad): Rahan Gelinta Xuquuqda Hantida Maanka (Intellectual Property Rights)

1. Xuquuqda hantida maanka, oo ay ku jiraan: calaamadaha ganacsi, xuquuqda qorista iyo daabacaadda, barnaamijyada kombiyuutarka, hal-abuurka farsamo, iyo xuquuq kasta oo kale oo ay la xidhiidhta hal-abuurka maskaxeed, waxa loo aqoonsan karaa hanti sharci ah oo rahan lagu gelin karo, haddii ay buuxiso shuruudaha hoos ku xusan:
 - a. In xuquuqdu tahay mid sharci ahaan la aqoonsan yahay isla markaana aan khilaafsanayn shareecada Islaamka.
 - b. In rahan-bixiyuhu si buuxda oo sharci ah u leeyahay xuquuqda la rahan gelinayo, iyadoo ay jirto caddayn rasmi ah oo milkiyadeed, sida shati, diiwaangelin, ama caddeyn kale oo sharcigu oggol yahay.
 - c. In xuquuqdaasi leedahay qiime maaliyadeed oo suuqeed oo lagu qiimeyn karo hab la aqbali karo oo hufan.
 - d. In xuquuqdaasi ay tahay mid deynta lagu dabooli karo, haddii rahan-bixiyuhu ku guuldareysto bixinta deynta, iyadoo loo marayo hab sharci ah sida wareejin ama iib sharciyeed.
2. Rahan gelinta xuquuqda hantida maanka waa in lagu caddeeyaa si rasmi ah oo qoran, loogana dhigaa qodob ka mid ah heshiiska rahan, iyadoo la raacayo qawaaniinta khuseeya rahan gelinta hantida aan maguurtada ahayn ee ay shareecadu oggolaatay.

Qodobka 6aad: Waxay guddidu badashay ciwaanka qodobka oo ka dhigtay “Tiirarka Dhismaha Rahanka,” waxayna ku soo koobtay 5 farqadood. Waxaan soo jeedinayaa in qodobkan cinwaankiisa iyo faqradihiisaba sidooda loo daayo.

Qodobka 7aad: Shuruudaha Heshiiska Rahanka Waxaan soo jeedinayaa in qodobkan cinwaankiisa iyo faqradihiisaba sidooda loo daayo.

Qodobka 8aad: Shuruudaha Deyn-bixiyaha iyo Deysanaha

1. Deyn-bixiyuhu waa in uu ahaadaa Adeeg-bixiye maaliyadeed oo si rasmi ah uga diiwaan gashan Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana ka haysta ruqsad Baanka Dhexe ee JSL, una shaqeeya si waafaqsan shareecada Islaamka.
2. Deysanuhu waa in uu noqdaa qof ama shirkad leh shakhsiyad qaanuuni ah oo la amaahiyey lacag ama loo sameeyay maalgelin si waafaqsan shareecada Islaamka.

Qodobka 9aad: Xuquuqaha iyo Waajibaadka Deysanaha. Qodobkan 9aad oo ka kooban 10 farqadood waa in sidiisa loo daayo, wax ka beddelka guddida dhaqaaluhu ku sameysay waxa uu keenay in qaarna iska horyimaadaan, qaarna shareecada ka horyimaad sidii guddida shareecadu sheegtay.

Qodobka 10aad: Xuquuqaha iyo Waajibaadka Deyn-Bixiyaha. Faqradda 3aad ee wax ka beddelka guddidu ku sameysay waxa ka saxsan qaanuun ahaan iyo shareeco ahaanba sida xeerka asalka ah ku qoran, sidaa darteed waan in qodobkanna sidiisa loo daayaa.

Qodob cusub (Qodobka 12aad): Maareynta Hantida Rahman Marka Deysanuhu Geeriyoo

1. Haddii deysanuhu geeriyoodo ka hor inta aanu bixin deynta oo dhan ama qayb ka mid ah dhammaan waajibaadka bixinta daynta, xuquuqda hantida Rahmanku waxay si toos ah ugu wareegayaan dhaxal-sugayaasha sharciga ah ee deysanaha geeriyooday.
2. Hantida la rahmay waxaa loo tixgelinayaa qayb ka mid ah hantida dhaxalka, waxaana laga jari doonaa deynta ku hadhay deysanaha, iyadoo la ilaalinayo habraaca dhaxalka si waafaqsan shareecada Islaamka iyo mabaadi'da caddaaladda.
3. Dhaxal-sugayaasha waxaa lagu waajibinayaa inay bixiyaan deynta loo haysto hantida la rahmay, iyagoo raacaya shuruudaha iyo qodobada ku cad heshiiska rahanka.
4. Dhaxal-sugayaashu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan in bixinta deynta lagu sameeyo dib-u-habeyn ama qayb-qaybin, iyadoo lagu saleynayo jadwal cusub oo waafaqsan awoodda dhaqaale iyo duruufaha nololeed ee dhaxal-sugayaasha.
5. Dib-u-habaynta ama qayb-qaybinta bixinta deynta waxaa lagu saleynayaa heshiis rasmi ah oo lala galo deyn-bixiyaha ama iyadoo lagu go'aamiyo xukun maxkamadeed oo kasoo baxa garsoore awood u leh, si looga fogaado culays dhaqaale oo aan la qaadi karin.

6. Deyn-bixiyuhu waxa uu xaq u leeyahay inuu ka dalbado bixinta deynta dhaxal-sugayaasha, haddii ay ka gaabiyaan bixinta deynta, wuxuu qaadi karaa dhammaan tallaabooyinka sharciga ah ee loo baahan yahay si uu u xaqiijiyo xuquuqdiisa, oo ay ku jirto iibinta hantida la rahmay, kadib marka la maro habraacyada sharciga ah.
7. Deyn-bixiyuhu kama dalban karo dhaxal-sugayaasha wax ka badan asalka deynta ku xusan heshiiska hore, waxaana reebban in heshiiska dib-u-habeynta jadwalka bixinta dayntu noqdo mid lagu helo faa'iidooyin dheeraad ah.
8. Wax kasta oo la xidhiidha fulinta qodobkan waxaa lagu saleynayaa mabaadi'da shareecada Islaamka iyo xeerarka dalka, iyadoo la ilaalinayo xuquuqda labada dhinac ee deyn-bixiyaha iyo dhaxal-sugayaasha.

Md. Jaamac Abokor Dube (02min, 58sec): - Bismillaahi Raxmaani Raxiim, **Guddoomiyeha** Golaha, mudanayaasha, shaqaalaha Golaha, **Guddoomiye** Yaasiin, waan ku salaamaynaa soo dhawoow. Xeerkani waa xeer muhiim ah, waa xeer garnaqaya marwalba laba dhinac oo is haya oo loo baahan yahay in lagu kala saaro. Runtii waxa uu u baahan yahay sharci yaqaano iyo microfinance Islaamic ah, iyo in meelo badan laga eego. Xeerkani waa xeerkii danyarta iyo dadka wax haysta u dhaxeeyay, waana labo qolo oo aad iyo aad u kala fog oo aan isu roonayn.

Waxaan jeclaan lahaa in xeerka lagu noqdo oo aad loo akhriyo oo laga doodo, oo uu noqdo xeer cadaalad leh, Ilaahayna hayee intii aynu awoodno ee karaan keena ah aynu ka dhigno. Waayo xeer beegti ayuu noqonayaa oo waa xeer lagu kala baxayo, waliba waa xeer hantiyeed oo meesha dhaqaale, lacag, hanti, iyo aduunka marayo dee hawshiisu ma yar. Guud ahaan baan u odhanayaa.

Qodobka 6aad, faqradiisa 5aad, waa in uu deyn-qaatuhu ahaado mulkiilaha dhabta ah ee hantida. Anigu waxaan isleeyahay deyn-qaatuhu hantida waxa uu deyn ku qaadan karaa, hanti uu mulkiyadeeda leeyahay iyo mid qof kale leeyahay oo uu qofka kale ogolaansho ka haysto. Tusaale ahaan, haddii aan Cabdikariin ka dhigo hantidayda, dee wuu u qaadan karaa. Laakiin qof aan hantiba lahayn haddii doonayo inuu wax amaahdo, hadii uu qof kale ka dhigo rahanka, halkaa waxa aynu u baahan nahay in la saxno, in lagu kordhiyo qofku hantidiisa in uu qof kale ku damiin karo haddii uu isagu raali ka yahay, oo waraaqihii iyo sharciyadii loo baahnaa uu marayo.

Md. Cabdikariin Aadan Cali (02min, 01sec): - Bismillaahi Raxmaani Raxiim, mudane **Guddoomiye** iyo mudanayaal, aad baad u salaaman tihiin, **Guddoomiyehana** si aad ah baan u soo dhawaynaynaa, waanan ku faraxsan nahay isaga oo caafimaad qaba in Ilaahay soo celiyay shaqadiina uu dib inoola bilaabay. Mudane **Guddoomiye**, rahanka ayaan u eegayaa seddex qaybood:

1. Rahanka cida wax rahmanaysa ee lacagta bixinaysa ee lagu wareejinaayo ee gacanta laga galinayo sida qalab, dahab, saacado qaali ah ama wax la mid ah.
2. Rahanka ma talan qof guri uu dagan yahay oo lagu rahmayo oo uu lacag ku qaadanayo, oo uu guri ku iibsano oo “mortgage” la yidhaahdo.
3. Rahanka matalan, oo uu qofku gurigiisa ama hanti uu leeyahay rahmayo si uu u helo lacagtaasi, oo inta badan gasha ganacsi iyo wax la mid ah.

Sidii uu sheegayay xildhibaanku, dadka lacagta amaahanaya xaquuqahooda waa in aad loo eego. Waxaan ku dari lahaa xaga xuquuqaha, si uu qofka guri rahmada ama mortgage ku qaata xalaal ah, haddii uu iska bixin kari waayo lacagtii lagula balamay, in uu heshiis dib u galayo bangigii lacagta siiyay, oo uu isla bangigiisii ama bangi kale remortgage ku samayn karo. Remortgage-kaasi oo ah in cid siin karta deyn ay daynkii bangiga ka bixiso, isla markaana wixiisii uu haysto ama ay kaash u celinayaan, si aan looga xaraashin ama uu gurigiiba u sii jiri karo, oo mortgage-kii hore ka sareeya u heli karo. Rahanka tooska ahna waa in lagu daro xuquuq iyo waajibaad ka dhalanaya, mortgage iyo remortgage Islaamiga ah shuruudihii ka dhalan lahaa waa in lagu daro.

Md. Maxamed Jaamac Ismaaciil (Kood-Buur) (04min, 38sec): - Bismillaahi Raxmaani Raxiim, **Guddoomiye**, waad mahadsan tahay, waan ku salaamayaa, waanan ku soo dhawaynayaa. Waxaan rajaynayaa in aad nasasho fiican soo qaadatay.

Waxaan ku dari lahaa xeerka toddoba qodob oo muhiim ah si uu unoqdo mid dhameystiran oo waafaqsan shareecada Islaamka, isla markana la jaanqaadaya nidaamyada caalamiga ah ee maaliyada ee maanta.

Qodobka 1aad: Ilaalinta xuquuqda dadka isticmaala adeega (“Consumer Protection”), in lagu daro qodob qeexaya xuquuqda deysanaha, sida inaanay jirin ribo qarsoon ama heshiisyo adag oo dhaawacaya awooda deysanaha, iyo in deysanaha la siiyo ogaysiis cad oo ku saabsan shuruudaha, qiimaha, iyo muddada daynta ka hor inta aanu saxeexin heshiiska.

Qodobka 2aad: Nidaamka qiimeynta hantida la rahmayo, in qiimeyn lagu sameeyo si madax-bannaan, oo uu sameeyo qiimeeye xirfadle ah, oo qiimaynta la cusboonaysiiyo haddii muddo dheer ka soo wareegto.

Qodobka 3aad: Ilaalinta sharciga, deegaanka, iyo bulshada. Haddii hantida la rahmayo tahay mida ku xidhan dhul ama mashquulaca leh, saamaynaysa deegaanka ama bulshada, waa in heshiiska lagu cadeeyo in dhammaan sharciyada deegaanka iyo xuquuqda dadka iyo deegaanka la ilaaliyo.

Qodob kale oo aan ku dari lahaa waa maareynta khilaafaadka, in marka hore lagu xaliyo wada-xaajood iyo dhex-dhexaadin (“Mediation”) ka hor inta aan maxkamad la gaynin.

Maxkamadda gobolka waa in ay awood gaar ah u leedahay dacwadaha degdega ah ee khuseeya xeerka rahanka iyo xaraashka.

Qodob kale oo muhiim ah waa hantida dhijitaalka ah ama mustaqbalka loo yaqaano “Financial Technology.” Xeerku hore usoo qaatay Sakuuk iyo lacagta elektarooniga ah, balse waxaan ku dari lahaa in la ogolaado rahanka hantida dhijitaalka ah (“Digital Asset”) sida keydka xogeed (“Software Both”) ama adeegyada “Port Change,” iyadoo la hubinayo inaanay khilaafsanayn shareecada Islaamka.

Sidoo kale, qodob ilaalinaya xogta iyo nidaamka online-ka maadaama Bangiga Dhexe uu abuuri doono nidaam online ah oo lagu kaydinayo xogta rahanka, waa in xeerka lagu daro waajibaad ilaalinaya xogta (“Data Protection”) iyo sirta macaamiisha.

Qodobkayga ugu dambeeya waxa uu ku saabsan yahay waajibka bangiyada gaar ahaan in ay soo saaraan warbixin sanad leh oo ku saabsan dhammaan rahnada ay hayaan si hufnaan (“Transparency”) iyo in ciqaab la saaro (“Penalties”) haddii bangi ku xad gudbo xeerka ama isticmaalo hanti rahman si sharci darro ah.

Cawad Cali Maxamed
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI